

**X. M. J. 5 Juunyo 1961, lamba. 203**

**Dhisidda Xafiyo qaalliyo**

**MADAXWEYNAHA JAMHUURIYAAD**

Markuu arkay qodobka 96 lamba. 5, ee Dastuurka;

Markuu arkay qodobka 81, ee Nidaamka Garsoorka oo lagu oggolaaday amargooyada 2 Faberaayo 1956, lamba. 5;

Markuu garwaaqsaday baahida loo qabo in dhiso xafiisyo qaalli laga dhiso degaannada baahida degdegta ahi u qaba;

Markuu dhegeystay Golaha Sare, ee Garsoorka, oo bixiyey talo oggol ah ka bixiyey dhisidda Xafiisyada Qaalli, ee hoos ku tilmaaman;

**WUXUU XEERINAYAA (WUXUU SOO SAARAYAA XEERKA SOO SOCDA)**

Laga bilaabo isla goorta, waxaa la dhisayaa Xafiisyada qaadiyada, ee soo socda:

- Jarriban, ee Degmada Gaalkacyo oo awood garsoor ku leh dhulka u dhexeeya xuduudaha soo socda; waaqooyi Gawle , koofur Diyaanda, bari Godobjiraan iyo galbeed Balli – Busle;
- Gellinsoor, ee Degmada Gaalkacyo oo awood-garsoor ku leh dhulka u dhexeeya xuduudaha soo socda: waaqooyi Degli, koofur Buurweyn, bari jidka Gallisoor – Gaalkacyo iyo galbeed Balli Cad;
- Ceel-Waaq, ee Degmada Luuq oo awood-garssor ku leh dhulka u dhexeeya xuduudaha soo socda; dhinac waxaa ka xiga Malaka oo ku jirta awoodda garsoor, ee Qaaliga Doolow; dhinac Dabley oo ku jirta awood-garsoor, ee qaalliga Luuq, dhinacna Kantama oo awoodda-garssor, ee Qaalliga sarinley.

Muqdisho, 5<sup>ta</sup> Juunyo 1961.

**Adan Cabdulle Cusmaan**

Wasiirka Arrimaha Diinta iyo Caddaaladda  
**Maxamuud Axmed Maxamed Caddaan**

Waa arkay waana Diiwaangeliyey –

Diiw. lamba. 7 – Xaashi lamba. 205

Muqdisho, 17<sup>ka</sup> Luulyo 1961.